

# Ku ciyaar xarafyada iyo lambarada

Waxaa jiro ciyaaro badan aad la ciyaari kartid ee leh ereyoyin iyo lambaro, markii la eego qaabkooda iyo dhawaaqooda iyo barashada ereyoyin cusub oo isla qaybsado isla xarafka koowaad. Waxaad raadin kartaa lambaro uu ilmahaada aqoonsan doono, sida lambarada albaabada ama da'dooda, oo eeg haddii lambaradaas ka heli kartid basaska, dukaamada ama calaamadaha waddada. Xasuuso in xarafyada iyo lambarada meel kasto laga heli karo!

## Talada xiddigta

Ilmahaada cod dheer isla tiriya - isla ogaada imisa tallaabo aad u baahan tihii si aad u gaartaan albaabka guriga ama imisa nalal ee waddada aad soo ag marten markii aad u lugeyneysiin beerta!

## Fikrada sheekaysiga

Ka hadal xarafyada aad ka heli kartid waraaqaha lagu soo diro iyo joornaalada duugga ah. Xarafyada soo jar iyo isku dheji Isku day haddii aad heli kartid xarafka koowaad ee magaca ilmahaada. Haddii aysan aqoonsan karin xarafka, isla qora iyo isla eega haddii aad arki kartiin markii aad dibedda u baxdaan.



## 'Waxaan u socdaa beerta'

Ciyaar isla ciyaara idinkoo midkiiba tooko qaadanaayo oo sheegaayo inaad safar u baxaysiin beerta. Shardiiga waxaa weeye inaad hore u qaadan kartid wax ka bilaabanaayo dhawaaqa xarafka 'b' (tusaale ahaan, 'Waxaan u socdaa beerta iyo waxaan horey u qaadan doonaa buug/biyo/baaskiil'). Waxaad lahaan kartaa maad ka badan adigoo beddelaayo meesha aad u socoto (tusaale ahaan haddii aad xeebta u socoto, waxaad hore u soo qaadan kartaa wax ka bilaabmo 'x'). Miyaad xasuusan kartaa wax kasto aad qaadan doontid?

## Dhoobada ciyaarta

Isku daya inaad xarafyada ka sameyso dhoobada ciyaarta, ama dhoobadaada ciyaarta adiga sameyso

Isku qas:

- labo koob oo bur ah
- ½ koob oo biyo qabow
- seddax qaado oo saliid ah
- hal qaado oo qasiir liin ah (waa ikhtiyaar)
- ranjiga lagu daro cuntada ama walaaxyada birbirqaaya.



## Fikrada sheekaysiga

Si loo dhirrigeliyo wax aqriska ilmahaada, isticmaal dhawaaqa xarafyada intii aad isticmaali leheed magaca ereyoyinka. Istimaal dhawaaqyada xarafyada markaad ku ciyaareysid ciyaaraha sida 'waxaan u socdaa beerta' ama 'waxaan isha ku haayaa' waxaad ku caawin doontaa dhawaaqa ereyoyinka intii ay ka baranayaan wax aqrinta.